MEELAHA LAGA HELI KARO MACLUUMAADKA OO DHAN

Arimaha deg-degga ah (Emergencies)	1
Adeega gaariga (Car services)	2
Daryeelka caruurta (Childcare)	3
Dharka iyo alaabta guriga (Clothing and Household Items)	4
Waxbarashadda (Education)	5
Qorshaha qoyska (Family Planning)	6
Adeegyada qoyska (Family Services)	7
Cunto, dhar ama hooy (Food, Clothes or Shelter)	8
Baashaalka (Fun)	9
Qashinka iyo qashin qubka (Garbage and Recycling)	9
Dukaanada cuntada (Groceries)	10
Caymiska caafimaadka (Health Insurance)	10
Guryeynta (Housing)	11
Shaqooyinka (Jobs)	12
Talooyin sharciyadeed iyo maaliyadeed (Legal or Financial Advice)	13
Maktabadda (Library)	13
Shatiyada (Licenses)	14
Boostada (Mail)	14
Caawinaad caafimaad (Medical Help)	15
Xuquuqda (Rights)	16
Canshuuraha (Taxes)	17
Tarjumada (Translation)	17
Gaadiidka (Transportation)	18
Korontada, biyaha iwm (utilities)	19
Ka hortaga xad gudubka (Violence Prevention)	20
Cod bixinta (Voting)	20

Macluumaadka buugaan ku jira waxaa loo soo guuriyey si uu u caawiyo muhaajiriinta iyo dadka deegaanka ku cusub si ay ugu helaan adeegga ay baahan yihiin. Gudigeena Isku xirka wuxuu daryeel weyn siiyey inuu sugo macluumaadka ku jira buuggaan in ay noqdaan kuwo sax ah, laakiin fadlan, xusuusnow in adeegyada iyo lambaradda telefoonada ay is bedeli karaan.

Waxaa mahad iska leh Isbaheysiga dadweynaha iyo Degmadda St.Louis park waxayna ku mahadsan yihiin taageeradooda. Waxaan bogaadin u soo jeedineynaa Ururka Haweenka Codka bixiya ee St. Louis Park. Buuggaan wuxuu ku qornaan doonaa afafka Ruushka iyo Isbaanishka

XUSUUS QORID:

WAXAAN U BAAHANAHAY GAADIID
GUDIGA GAARKA AH EE SOCODKA GAADIIDKA EE NAWAAXIGA MAGAALADDA (MTC) 612-349-7000
Jadwalada baska iyo macluumaadka baska magaaladda

TAKSIGA SUBURBAN TAXI: 952-545-1234
Dad Isbaanishka ku hadla ayaa la heli karaa

TAKSIGA YELLOW CAB: 612-824-4000
STEP: 952-925-4899
Waxaa la heli karaa gaadiid u qaada goobaha caafimaadka muwaadhiniinta waa weyn iyo dadka da'da weyn oo curyaamiinta ah

WAXQABADKA BULSHADDA OO LOOGU TALAGALEY NAWAAXIGA HENNEPIN
(CASH): 952-933-9639
Baabuur la soo tabarucey, hagaajin iyo caawinaad gaadiid

WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…
Haddii aad raacaysid bas, waxaad raadisaa calaamadda tilmaameysa "BUS STOP" haddii aadan weligaa raacin bas waxaad hore u soo qaadataa cinwaanka aad u socotid, waxaadna u dhiibtaa darawalka baska si aad u hubsitid in aad dooratey baska saxa ah. Jadwaladda basaska waxaa laga heli karaa gudaha baska.

Haddii aad taksi u yeeraneysid, u sheeg qofka baska soo dira cinwaanka aad u socotid, waxaana wanaagsan in qof Ingiriiska yaqaana inuu waco. Haddii ay ilmo yar kula socdaan waa in aad hore u soo qaadataa kursiga caruurta baabuurta lagu saaro. U xadid tirada raacaysa hal taksi ilaa iyo shan qof.

WAXAAN KAALMO UGA BAAHANAHAY DARYEELKA CARUURTA
WAXBARASHADDA BULSHADDA: 952-928-6764
Macluumaad ku saabsan daryeelka ilmaha yar yar 6 isbuuc jir iyo heerka lixaad ee iskuulka

XIRIIRKA WEYN EE XANAANEYNTA CARUURTA EE MINNEAPOLIS (GMDCA): 612-341-1177
Macluumaadka daryeelka caruurta iyo kaalmeynta

XARUNTA WEYN EE GARGAARKA DHIBAATOOYINKA: 952-591-0100
Daryeel caruur oo waqti gaaban ah oo loogu talagaley ilmaha waalidkoodu dhibaateysan oo si nabad ku jirto u ilaalin karin ilmahooda.

WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO...
Haddii aad tahay waalid shaqeeya oo u baahan qof kuu ilaaliya caruurtaada inta aad shaqadda ku maqan tahay, la xiriir labada hey'adood oo kor ku xusan. Waalidka waxay bixiyaan isbuuc walba lacagta cunug walba ay ka diiwaan geliyeen xanaaneynta caruurta.

Haddii dakhliga qoyskaada uu xaddidan yahay, waxaa laga yaabaa in aad heshid kaalmada adeegga xanaaneynta caruurta oo lacag yar la bixiyo (lacagta qaar lagaa bixiyo). Haddii dakhligaada uu xaddidan yahay oo aadan ka qeybqaadaneynin Barnaamijka Horumarinta Qoyska Minnesota (MFIP), oo si sharci ah aad ugu shaqeysan kartid dalka Mareykanka, la xiriir marka hore Xiriirka Weyn ee Xanaaneynta Caruurta ee Minneapolis.

Haddii aad ka qeybqaadaneysid MFIP-ka, la xiriir qofka mas'uulka ka ah kiiskaada ee deegaanka Hennepin si aad u ogaatid in aad ku heli kartid xanaaneynta caruurta qiimo la yareeyey.
Badanaa xarumaha daryeelka caruurta waxay ku buuxsamaan si deg-deg ah waxayna lee yihiin liis sugitaan oo dadka lagu qoro. Arinkaan waxaa loola jeedaa in sida ugu deg-degta badan aad ula xiriirtid lambarada lagu siiyey marka aad ogaatid in aad u baahan tahay daryeel caruur.
Booqo xarunta daryeelka caruurta inta aadan ka ddiwaan gelin cunugaada si aad u hubsitid in aad isku haleyn kartid macalimiinta, barnaamijka iyo sharciyadooda.
Iskuulaadka xaafadda waxay bixiyaan waqtiga iskuulka ka hor iyo ka dibba daryeel caruur oo loogu talagaley caruurta da'doodu iskuul in la geeyo gaartey
Adeeggaan wuxuu bilaash u yahay qoysaska u qalma qadada bilaashka ah ama lacagteeda laga yareeyo. Wax ka weydii adeeggaan marka aad diiwaan gelineysid cunugaada.

WAXAAN U BAAHAN NAHAY DHAR IYO WAXYAABHA SHAKHSI AHAAN LOOGU BAAHAN YAHAY OO LA SOO ISTICMAALEY IN AAN KU GATO SICIR GOR GORTAN LEH

GOOD WILL	1025 HILL ST. HOPKINS 952-935-2760
SALVATION ARMY STORE	1404 MAINSTREET, HOPKINS 952-932-0814
FREE STORE	1510 FRANKLIN VE. E, MINNEAPOLIS 952-870-1144
BETHESDA THRIFT SHOP	913 MAINSTREET, HOPKINS 952-939-0988
ARC VALUE VILLAGE THRIFT STORES	2751 WINNETKA AVE., NEW HOPE 763-544-0006

WAXAAN CAAWINAAD UGA BAAHANAHAY CANSHUURAADKEYGA

WAAXDA DAKHLIGA EE MINNESOTA
651-296-3781
Waxaa loogu talagaley in lagaaga jawaabo su'aalaha la xiriira canshuurahaada.

WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…
Waxaa laguu sheegi doonaa meesha aad ka heli lahayd khabiir canshuuraha oo mutadhawic ah. Tarjumaan ayaa la helayaa.

WAXAAN CAAWINAAD UGA BAAHANAHAY QORAAL LA TARJUMO AMA TARJUMADA AFKA AH

SOOMAALI: URURKA JAALIYADDA SOOMAALIDA EE MINNESOTA
(Somali Community of Minnesota) 612-871-6786

BARNAAMIJKA WAXBARASHADA QOYSKA EE CARUURNIMADA HORE (ECFE): 952-928-6765
Barnaamijyo loogu tala galey ilmaha, kuwa iskuulka loo diyaarinaayo iyo waalidkooda

ISKUULKA KULAYLAHA: 952-928-6325
Barnaamijyo lagu madadaaleysto iyo kuwa akadeemik ah oo la qabto xilliga kuleylaha.

LENOX: 952-928-6444
Barnaamijyo lagu madadaaleyssto iyo kuwa waxbarasho oo loogu tala galey shakhsiyaadka da'doodu ay ka weyn tahay 55 sano

WAXBARASHADA BULSHADA: 952-928-6442
Fasalo ku saabsan kumbiyuutar, tarbiyada caruurta, wax karinta, hiwaayada iyo mowduucyo kale oo farabadan, barnaamijyada muwaadhiniinta da'da weyn iyo tanaadinta da'da weyn.

WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…
INTERNATIONAL INSTITUTE OF MINNESOTA:
651-647-0191
Machadkaan wuxuu bixiyaa koorso deg-deg ah oo lix isbuuc ah oo dadka lagu bari doono xirfad nololeedka lagu isticmaalo maalin walba dalka Maraykanka. Koorsadaan waxay xoogga saarataa Ingiriiska asaasiga ah, nabad gelyada guriga, daryeelka caafimaadka, arimaha deg-degga ah 911, kalandaariyaha iyo waqtiga, lacagta, xirfadaha isticmaalka telefoonka, adeegashada, raacitaanka baska iyo xirfadaha shaqada. Waxay dadka u diraan fasalo Ingiriiska lagu barto iyo meelaha shaqada laga rajeynayo.

WAXAAN CAAWINAAD UGA QORSHAHA QOYSKA
CENTRAL CLINIC: 612-813-8050
Qorshaha qoyska, Cudurada ku gudba isutaga lab iyo dheddig (STD) iyo hubinta uurka iyo gargaarka caafimaadka (waxaa loogu hadlaa Ingiriis iyo Isbaanish, laakiin dadka ku hadla luqadaha kale waa la soo dhaweynayaa)
QORSHEYNTA WAALIDNIMADA: 612-823-6300
Qorshaha qoyska, STD iyo hubinta uurka iyo gargaarka caafimaadka
BARNAAMIJKA WAXQABADKA QORSHEYNTA QOYSKA EE DEEGAANKA HENNEPIN: 763-569-2664
Macluumaad ku saabsan wadooyinka iska ilaalinta dhalmada iyo in lagaa caawiyo bixinta lacagta hubinta caafimaadka iyo wadooyin loogu tala galey iska ilaalinta dhalmada

WAXAAN U BAAHANAHAY CAAWINAAD CAAFIMAAD

ISBITAALKA METHODIT: 952-993-5000
Adeeg caafimaad oo buuxa, oo ay ka mid yihiin adeegyada deg-degga ah. Adeegyo tarjumaan ayaa la heli karaa.
RUGTA CAAFIMAADKA PARK NICCOLET: 952-993-3123
Waxaad ka heli kartaa adeeg caafimaad oo dhameystiran oo ay kamidka yihiin daryeel caafimaad oo loogu talagaley qoysaska, dadka da'da ah, haweenka iyo caruurt. Haddii aad caawinaad ugu baahan tahay si deg-deg ah laakiin xaaladu aysan ahayn mid nafta khatar gelinaysa, waxaad aadi kartaa ama waci aad kartaa gar-gaarka deg-degga ah oo telefoonkoodu yahay 952-993-3512. Wuxuuna furan yahay Isniinta ilaa iyo Jimcaha laga bilaabo 8:00 subaxnimo ilaa iyo 8:00 fiidnimo, maalmaha Sabtida, Axada iyo maalmaha fasaxa ahna wuxuu furan yahay 8:00 subaxnimo ilaa iyo 5:00 galabnimo. Adeegyo tarjumo ayaa la heli karaa. Looma baahna in ballan la sameysto, laakiin waan in aad doorkaada sugtaa. Haddii aad isticmaaleysid adeegga gar-gaarga deg-degga ah, isdiiwaan geli marka aad imaatid, dabadeedna u dhiib caymiskaada lacagta kula bixinaaya. Waad isticmaali kartaa rugtaan caafimaad xataa haddii aadan heysan caymis laakiin waxaad filanaysaa in aad bixin doonto lacagta deryaalka aad heshay.
RUGTA CAAFIMAADKA ST MARY'S: 651-690-7029
Dadka xaafada degan oo aan caymis heysan ama dakhligooda uu xaddidan yahay waxay wici karaan oo ballan daryeel caafimaad ka sameysan karaan Rugta caafimaadka ee St. Mary's. St. Mary's waxay ballan kugu sameyn doonaa Rugta Caafimaadka Creekside oo ku yaala St. Paul.
RUGTA CAAFIMAADKA CREEKSIDE PARK NICCOLET:
952-993-7700
Waxaa laga heli karaa adeeg caafimaad oo buuxa, waxaad kaloo ka heli kartaa caawinaad xagga Isbaanishka iyo Ruushka, sidaasi oo kale waxaad ka heli kartaa caawinaad buuxinta foomamka caafimaadka.
RUGTA CAAFIMAADKA CENTRAL CLINIC: 952-993-1100
Ilmaha iyo da' yarta ilaa iyo 8 jir waxay rugtaan caafimaad ka heli karaan daryeel caafimaad oo bilaash ah maalmaha Talaadada iyo Arbacada inta u dhaxeysa 1:30 ilaa iyo 4:30 galabnimo. Rugtaan caafimaad waxay ku taalaa qolka 228 ee Central Community Center. La xiriir (wac) si aad ballan u sameysatid.

WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…
Waxyaabaha deg-degga ah! Wac 911 hadii adiga ama qof qoyska ka tirsan uu u baahdo caafimaad deg-deg ah ayadoo ay ugu wacan tahay ilmo dhalid, shil, ama xaalad nafta khatar gelineysa sida wadna istaag! Horinta badbaadinta waxay imaan doonaa gurigaada waxaana laga yaabaa in ay qofka u qaadaan isbitaalka.
Adeegga dhakhtarka ilkaha waxaa laga heli karaa buugga (bogagga) jaalaha ah ee buugga telefoonada (Yellow pages)

WAXAAN U BAAHANAHAY CUNTO, DHAR AMA GABOOD

BARNAAMIJKA DEG-DEGGA AH EE ST.LOUIS PARK (STEP): 952-925-4899
Adeegyada deg-degga ah waxaa ka mid ah cunto, dhar, qalabka iskuulka iyo caawinaad maaliyadeed oo loogu talagaley ijaarka, deynta guriga ama korontada, biyaha, gaaska iwm (utilities)

BARNAAMIJKA HORUMARINTA QOYSKA MINNESOTA (MFIP)- ADEEG CAAWINAAD MAALIYADEED: 952-541-6271
Waxaa laga heli karaa caawinaad ku meel gaar ah oo loogu talagaley dadka da'da ah iyo qoysaska caruur u baahan cunto, tikidhada cuntada, dhar iyo gabood.

CUNTO LOOGU TALAGALEY DADKA OO DHAN- ST. LUKE'S LUTHERAN CHURCH: 952-929-5507
Waxaa laga heli karaa caawinaad raashiin oo loogu talagaley dadka u baahan.

WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…

Waa inaad shakhsi ahaan u codsatid dakhliga bisha, tikidhada cuntada iyo/ama caawinaad caafimaad. Waxaa hore u keentaa waraaqaha loo baahan yahay: shahaadada dhalashada, warqada cadeynta xisaabta bangiga, lambarka kaarka nabadgelyada bulshada(sooshaal sekuuriti) iyo dukumiinti cadeynaya lahaanshaha hanti ma guurto ah.

HAWEENKA, DHALLAANKA, IYO CARUURTA (WIC): (612) 348-6100
Waxaa laga heli karaa caafimaad iyo qiimeyn nafaqo, tikidho lacag oo bilaasha ah oo loogu talagaley cunto tayo leh, haweenka uurka leh iyo kuwa ilmaha nuujiya, ilmaha iyo caruurta ilaa iyo 5 sano jir oo loo diro meelo farabadan oo ay ka heli karaan adeeg caafimaad iyo mid bulshadeed.

HOOYOOYINKA IYO CARUURTA (MAC): 651-484-8241
Waxaa laga heli karaa cunto bil walba ah oo miisaaman oo nafaqo leh oo loogu talagaley caruurta u qalanta ilaa iyo 6 sano jir ah, waxaana heli kara: Haweenka heysta cunug hal sano ka yar laakiin aan naaska nuujin, haweeney uur leh ama ilmo naas nuujisa ama dhallaan aan ku filneyn WIC-ga.

BARNAAMIJYADA KAALMADA NAFAQEYNTA OO LOOGU TALAGALEY DADKA DA'DA AH (NAPS): 651-484-8241
Waxaa laga heli karaa cunto bil walba ah oo isku xiran nafaqana leh oo loogu talagaley ragga iyo haweenka u qalma oo da'doodu ay weyn tahay 60 sano. Xarumo diineed oo farabadan ayaa bixiya caawinaad waqtigii loo baahdo. Wac ama booqo goobta cibaadada oo kuu dhow.

WAXAAN U BAAHANAHAY TALO SIIN XAGGA SHARCIGA AH AMA MID MAALIYADEED

BULSHADDA GARGAARKA SHARCIGA (Legal Aid Society): 612-334-5970
Waxay bixisaa caawinaad bilaash ah oo xagga sharciga ah ayna ka midka yihiin: dacwadaha sharciga guryeynta, faa'idooyinka dowlada, qoyska, waaxda socdaalka, shaqada, canshuuraha, dadka da'da weyn, dhalinyarada, sharciyada curyaanimada iyo ka faa'ideysiga (shaqaalaha waxaa ka mid ah mutarjumiin Soomaali ah iyo weliba Ruush, Hmong, Isbaanish, sidoo kale mutarjumiin kale ayaa la heli karaa)

WAX QABAD BULSHADEED LOOGU TALAGALEY NAWAAXIGA HENNEPIN (CASH) Community Action for Suburban Hennepin: 952-933-9639
Latalin miisaaniyadeed

LATALINTA MACAAMIISHA AMAAHDA (Consumer Credit Counseling): 651-439-4840
Soo wac si aad u sameysatid ballan la xiriirta mashaakilka lacagta

CENTRO LEGAL, INC.: 651-642-1890
Waxay bixiyaan adeeg loogu talagaley dadka ku hadla afka Isbaanishka

WAXAAN U BAAHANAHAY MAKTABAD

MAKTABADA ST.LOUIS PARK: 952-929-8108
3240 LIBRARY LANE, ST. LOUIS PARK
Waxaa laga heli karaa dhamaan noocyada kala duwan ee buugaagta, khariiradaha (maabka) iyo tusiyaha telefoonada oo lagu soo isticmaali karo muddo gaaban. Maktabadaan waxaa laga heli karaa waxyaabo af Ruush ku qoran, sidoo kale waxaa laga heli karaa adeegga Internetka.

WAXAAN U BAAHANAHAY IN AAN OGAADO MEESHA LAGA SOO GATO ADEEGGA GURIGA

ALMSTED'S SUPER VALU-
2326 LOUISIANA AVE. S.: 952-545-1894

COSTCO-5801- WEST 16TH ST.: 763-582-9610
Kaarka xubinimada ayaa wax lagu iibsan karaa

CUB FOODS – 3620 TEXAS AVE S.: 952-938-5959

RAINBOW FOODS – 8950 HWY 7: 952-935-4255

SAM'S CLUB – 3745 LOUISIANA: 952-924-9450
Kaarka xubinimada ayaa wax lagu iibsan karaa

Degmada St. Louis Park waxay leedahay bakhaaro kale oo cunto laga iibsan karo. Ka eeg yellow pages-ka ee buugga telefoonada si aad u heshid meelaha ay ku yaalaan iyo lambarada telefoonadooda.

WAXAAN U BAAHANAHAY CAYMISKA CAAFIMAADKA

CAAWINAA DHAQAALE OO DIBADGAAR AH- WEST SERVICES AREA, RIDGEDALE SERVICE CENTER: 952-541-6271
Waxaa laga heli karaa talobixin iyo qiimeynta waxa loo baahan yahay

CAAWINAADDA DHAQAALAHA EE DEEGAANKA HENNEPIN:
612-879-3999
Kala soo xiriir ballanta la xiriirta caymiska

WAXAAN U BAAHANAHAY GURYEYN

BARNAAMIJKA DEG-DEGGA AH EE ST. LOUIS PARK (STEP):
952-925-4899
Kala soo xiriir macluumaadka ku saabsan guryaha la heli karo

XARUNTA ILAHA MACLUUMAADKA QOYSKA EE AGAGAARKA HOPKINS – Liiska isku xirka guryaha (THE HOUSING LINK):
952-988-5350
Isbuuc walba waxaa laga heli karaa liiska guryo la awoodi karo oo ku yaala todobo deegaan oo ka tirsan nawaaxiga magaalada. Meeshaan ayaad ku fiirin kartaa liiska, waxaad kaloo heli kartaa telefoon aad dadka kula xiriirtid

KHADKA TELEFOONKA CAAWINTA: 612-333-4888
Waad khad telefoon oo aad ku weydiin kartid dhamaan su'aalaha la xiriira guryaha.

WAX QABAD BULSHADEED LOOGU TALAGALEY NAWAAXIGA HENNEPIN (CASH): 952-933-9639
Gadashada guryaha

MAAMULKA GURYEYNTA EE ST.LOUIS PARK: 952-924-2514
Waxaad ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan guryaha dhaqaale ahaan loo kabo (section 8) waxaad kaloo isbuuc walba ka heli kartaa guryaha kale oo la heli karo.

WAXAAN U BAAHANAHAY SHAQO

BARNAAMIJKA HORUMARINTA QOYSKA MINNESOTA (MFIP)
612-541-6271
Tababar iyo shaqo raadin loogu talgaley qoysaska dakhligoodu xaddidan yahay oo caruurna leh.

XARUNTA WAX QABAD SHAQADA: 612-752-8400
Tababar iyo shaqo helid oo lagu bixiyo xarunta Lenox Community Center

TABABAR IYO CAAWINAAD SHAQO (TEA): 612-348-8953
Tababar iyo caawinaad shaqo oo loogu talagaley qof walba oo shaqo u baahan.

HAWEENKA KU JIRA XAALADA KALA GUURKA (marka la furo ama dhibaato kale ay jirto): 612-752-8444

JEWISH VOCATIONAL SERVICES: 952-591-0300
Waxaa laga heli karaa tababar iyo caawinaad shaqo raadin

WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…

Haddii aad dhiganeysid barnaamijka u Barashada Ingiriiska sida Luqada labaad (ESL) weydii macalinkaada magaca qofka ka socda Employment Action Center (xarunta wax qabadka shaqada) qofkaasoo ku caawin kara. Haddii aad qabtid cunug yar oo aad ku jitid barnaamijka MFIP-ka, waxaa hubaal ah in goor hore laguu sameeyey qof kaa caawiya shaqo raadinta. Haddii aadan ka qeyb qaadaneynin barnaamijka MFIP-ka waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Wax qabadka Shaqada (Employment Action Center) si ay kuugula taliyaan adeeg shaqo oo haboon.

WAXAAN U BAAHANAHAY MEEL AY QOYSKEYGA AY KU CAYAARAAN

XARUNTA WAXBARASHADA BULSHADA EE ST. LOUIS PARK:
952-928-6777
CASHARADA DABAASHA: 952-928-6780

JARDIINOOYINKA IYO MADADAALADA: 952-924-2540
Waxaa lagu cayaaraa kubada kolayga, kubada laliska, cayaaraha fudud, taabashada kubada cagta, ku orodka barafka, dhacdooyinka qoyska, riwaayadaha xilliga kulaylaha, iyo dabaasha.

YMCA LAANTA RIDGEDALE: 952-944-7708
Madadaalada, jir dhiska iyo xerooyinka

YES KIDS (Haa caruurta): 952-938-1121
Barnaamijyo iskuulka ka dib ah oo loogu talagaley caruurta iyo dhacadooyinka qoyska.

WAXAAN SU'AAL KA QABAA QASHIN QUBKA AMA MEESHA LAGU RIDO WAXYAABAHA AAN LOO BAAHNEYN

Haddii aad degan tahay guri (house) ama laba guri oo is dul saaran waxaad wacdaa 952-924-2555 ama 763-783-5423. Haddii aad degan tahay guri ka tirsan dhismo guryo badan (apartment) la hadal ilaaliyaha guriga ama maamulka guriga.

WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…

Qashinka waxaa la qaadaa isbuuciiba hal mar oo isla hal waqti ah. 7:00da aroornimo markay tahay ku rid qashinkaada bac balaastik ah, si xoog ah u xir kuna rid meesha qashinka lagu rido ama meesha maamulka gurigaada uu kuu tilmaamo in aad ku ridid qashinka. Dadka degan xaafada St.Louis Park isagama tagi karaan waxyaabaha aysan rabin gurigooda hortiisa sida: maacuunta (alaabta guriga guud ahaan) iyo qalabka jikada. Konteenarada waxaa keena degmada St.Louis Park si loogu rido qasacdooyinka (daasadaha) dhalooyinka, waraaqaha iyo waxyaabaha balaastiga ah. Ku rid hal konteenar waraaqaha iyo dhalooyinka, qasacadaha iyo balaastikada mid kale.

WAXAAN U BAAHANAHAY SHATI (WARQAD WAX LAGU FASAXO)
XARUNTA ADEEGA DEEGAANKA HENNEPIN: 952-348-8240
12601 RIDGEDALE DRIVE, MINNETONKA

AAA MINNEAPOLIS: 952-927-2671
5400 AUTO CLUB WAY, ST. LOUIS PARK

WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…
Macluumaadka la xiriira bixinta sidii loo heli lahaa dhamaan noocyada kala duwan ee shatiyada(wadida baabuurta, guurka, baasaboorka iwm) shatiga ugaarsiga iyo kaluumeysiga waxaa laga heli karaa qaar ka mid ah dukaanada lagu iibiyo qalabka isboortiga, dukaanada laga soo gato cuntada wax lagu dabto ama bakhaarada alaabta lagu iibiyo. Imtixaanka shatiga baabuurta waxaa lagu bixiyaa ilaa iyo shan luqadood oo kala duwan. Waa in aad heysataa caymis (magac shirkada caymiska iyo lambarkaada) markii aad cusboonaysiinaysid shatiga wadida baabuurka ama lambarka baabuurka (taargaha)

WAXAAN U BAAHANAHAY IN AAN KU DIRSADO BOOSTADA WARQAD AMA BAAKAD
Wac 1800-275-8777
Waxaad macluumaadka ku heli doontaa Ingiriis ama Isbaanish
Xafiisyada boostada waxay ku yaaliin: 2700 Louisiana Ave. S iyo 3532 Beltline Blvd. St. Louis Park

WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…
Haddii aad rabtid in aad dirsatid warqad ama wax baakad ku jira waxaad aadi kartaa mid ka mid ah cinwaanada kor ku qoran. Haddii aad rabtid in waraaqahaada aad ka soo qaadatid xafiiska boostada waxaad ijaaran kartaa sanduuq boosto.
Waraaqaha u baahan istaambooyinka caadiga ah oo ku socota qof jooga dalka Mareykanka gudihiisa, waxaa lagu diri karaa sanduuqyada buluugga ah ee la dhigo dhicayada wadooyinka St.Louis Park.

WAXAAN CAAWINAAD UGU BAAHANAHAY QOYSKEYGA
MEELAHA CAAWINAADDA LOO WACO-
UNITED WAY: 651-291-0211
Caawinaad la xiriirta tusiyaha adeegyada iyo meesha laga bixiyo adeegyadaas iyo weliba ayadoo su'aalahaadi laga jawaabi doono 24 saac maalintii.

ADEEGYADA QOYSKA IYO HORUMARINTA CUNUGA EE ST. DAVID'S: 952-939-0396
Waxaa laga heli karaa waxbarasho waalid, talo siin, firfircoonida qoyska

ISKUULAADKA DEGMADA ST.LOUIS PARK 283
ADEEGYADA WAXBARASHADA QOYSKA: 952-928-6777
Waxaa laga heli karaa noocyo kala duwan oo daryeel ah oo loogu talagaley da'da iskuulka ka hor iyo daryeel loogu talagaley da'da iskuulka oo la heli karo waqtiga iskuulka ka hor iyo ka dibba

DA' YARTA (13-19) OO KELIYA: 952-988-8336
Talo siin muddo gaaban oo loogu talagaley caruurta halganka ku jira oo da'doodu u dhaxeyso 13-19 iyo waalidkooda

THE BRIDGE: 612-377-8800
Taakuleyn loogu talagaley waalidka daneeya caruurta da'doodu u dhaxeyso 13-19, waxaana la heli doonaa maqribyadii iyo maalmaha Sabtida iyo Axada.

WAXBARASHADA QOYSKA CARUURNIMADA HORE (ECFE): 952-928-6765
Waxaa laga heli karaa fasalo isbuuc walba la qaato oo loogu talagaley waalidiinta heysta ilmo yar ama cunug

URURKA ISUTAGA JAALIYADA SOOMAALIDA EE MINNESOTA
(CONFEDERATION OF SOMALI COMMUNITY IN MINNESOTA)
612-338-5282
Wuxuu dadka u diraa fasalo lagu barto Ingiriiska ESL-ka wuxuuna bixiyaa macluumaad ku saabsan daryeelka caafimaadka

URURKA HAWEENKA SOOMAALIDA
(SOMALIAN WOMEN'S ASSOCIATION): 612-821-5151
Waxaa laga heli karaa adeegyo shaqo, aqoonka la xiriirta caafimaadka iyo adeegyo kale

RIDGEDALE YMCA " KOOXDA WAALIDKA KELIGIISA AH":
952-582-8255

WAXAAN QABAA SU'AAL KU SAABSAN XAQA AAN LEEYAHAY MARKA AAN WAX IJAARTO

Gudiga Xuquuqda Aadanaha Ee St. Louis Park: 952-924-2506 - Ku war geli denbiyada la xiriira naceybka/eexda ama xaaladaha laguula dhaqmo si aan cadaalad ahayn ayadoo ay ugu wacan tahay qolada aad ka soo jeedo ama diintaada. Waxaad kaloo heli kartaa macluumaad ku saabsan ururo kale oo aad ka heli kartid sidii aad naftaada uga difaaci lahayd midab takoorka shaqada, guryaha, waxbarashada iyo amaahda.

Waaxda Xuquuqda Aadanaha Ee Minnesota: 651-296-5663

Ururka Dadka Wax Kiraysta Ee Minnesota: 612-871-7485 - Wuxuu caawiyaa dadka guriga kiraysta oo mishaakil ka heysta dadka guryaha iska leh

Homeline: 952-933-0017 - Wuxuu talo sharci ah ka bixiyaa heshiiska ijaarka guriga, lacagta caymiska (deposits) oo la soo celiyo, mishaakilka dayactirka, guri ka saarista, ama su'aalo kale oo la xiriira qofka wax ijaarta.

Bulshada Gargaarka Sharciga Ee Minnesota (Legal Socienty of MN): 612-334-5970 - Wuxuu bixiyaa caawinaad xagga sharciga ah oo ku saabsan kiisaska guryaha ayna ka midka yihiin guri ka saarista, dayactirka, section 8-ka, public housing-ga iwm.

Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Minnesota: 651-296-6196 - Waxaa laga heli karaa caawinta mishaakilaadka iyo buug yar oo loogu talagaley dadka guryaha ijaarta

Dhadka Telefoonka Kiraystiyaasha Oo Loogu Talagaley Ka Hor Taga Guri Ka Saarida: Dababarka Kriaystayaaha Iyo Barnaamijka Shahaadada: 651-224-1188 - Waxaa lagu bixiyaa fasalo ka caawiya dadka wax ijaarta sidii ay ku heli lahaayeen guryo la ijaarto

Mashruuca Sharciga Midabtakoorka Guryaha: 612-874-3774 - Waxaa laga heli karaa caawinaad la xiriirta kiisaska midabtakoorka guryaha.

Mashruuca Waxbarashada Sharciga Bulshada::612-588-2099 - Wuxuu daabacaa xaqiiqda waxyaabaha la xiriira guryaha, raadinta guryaha, dayactirka iwm

Waaxaa Wanaagsan In La Ogaado…

U akhri heshiiska ijaarka si taxadir leh. Ogow sharciyada u degsan guriga aad degan tahay. Ijaarkaada ku bixi waqtigii loogu talagaley. Lacagta la bixiyo waqti danbe waxay ka soo muuqataa diiwaankaada markii la soo baaro, waxay aad u adkeyn kartaa in meel kale wax lagaaga ijaaro. Waxaa iibsan kartaa caymiska kiraystiyaasha si aad u difaacdid hantidaada shakhsiga ah. Wixii mishaakilaad ah oo ku yimaada dhismaha ogeysii ilaaliyaha guriga ama maamulaha. Haddi mishaakilka aan la saxin waxaad wacdaa Waaxda Baaritaanka oo telefoonkoodu yahay 952-924-2682 waxaadna aad kala hadli kartaa daaqadaha la jebiyey, cayayaanka wax dhiba, kulayl la'aan ama biyo la'aan, mishaakilaadka la xiriira korontada ama haddii mashiinka qiiqa si wanaagsan u shaqeyneynin.

II SHEEG WAXBARASHO LOOGU TALAGALEY CARUURTA IYO DADKA WAAWEYN

ISKUULADA DEGMADA ST.LOUIS PARK 283
952-928-6000
Waxaa laga heli karaa macluumaadka iskuulada caruurta laga bilaabo fasalka barbaarinta ilaa iyo fasalka 12aad (da'da 5-21)

WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…

Qoysaska heysta caruurta waxaa looga baahan yahay in ay caruurtooda ku diiwaan geliyaan iskuulada sida ugu deg-degta badan. Dhamaan caruurta da'doodu u dhaxeyso 6-16 oo jooga gobolka Minnesota waa in ay iskuul dhigtaan. Caruurta da'doodu tahay 5 sano jir maalinta ugu horeysa ee iskuulka waxaa la geyn karaa dugsiga barbaarinta. Waxaa waalidiinta loogu baahan yahay marka ay ku diiwaan gelinaayaan caruurtooda fasalada barbaarinta in ay hore u keenaan shahaadada dhalashada, kaarka badbaadada bulshada (sooshaal sikuuriti) wax caddeynaya deganaanshaha iyo wax caddeynaya tallaalada ka hor taga cudurada.

Caruurta la geynayo iskuulada waa in laga tallaalaa ka hortaga jadeecada cas, jadeecada, qaamo-qashiirka , neefta, xiiq dheerta, cudarka beerka ku dhaca, teetenada iyo debaysha. Haddii cunugaada u baahan yahay in loo tallaalo iskuulka, waxaad ka heli kartaa rugta Central Clinic tallaal bilaash ah oo loogu talagaley dhalinta degmada St.Louis Park. Wac telefoonkaan 952-993-1100 si aad ballan u sameysatid.

Imaatinka iskuulka waxaa lagu sameyn doonaa dabagal joogto ah si loo hubsado in caruurta ay helayaan waxbarasho.
Iskuul walba waxaa laga helaa quraac iyo qado. Caruurta dakhliga qoyskoodu uu hooseeyo waxay heli karaan cunto bilaash ah ama lacagta la yareeyo.

KALA DOORASHADA WAXBARASHADA DADKA WAAWEYN:
952-988-5343
U barashada Ingiriiska sida Luqada labaad (ESL) Shahaadada U dhignaanshaha waxbarashada guud (GED) iyo waxbarashada asaasiga ah ee dadka waaweyn
Dadka waaweyn oo u baahan in ay Ingiriiska bartaan waxay heli karaan macluumaad ama is diiwaan gelin marka ay wacaan lambarka telefoonka kor ku xusan. Barnaamijka kala Doorashada waxbarashada dadka waaweyn waxaa lagu bixiyaa fasalo bilaash ah oo ay ka midka yihiin todobo heer oo barashada Ingiriiska sida luqada labaad ah. Sidaasi oo kale waxay bixiyaan muraajaco lagu sameeyo akhrinta, qorida ama xirfad xisaabeed, barnaamijka waxbarashada qoyska (gaadiid iyo daryeel caruur ayaa la bixiyaa) iyo weliba rabitaan shaqo. GED-ga waa barnaamij awood u siinaya ardayga inuu ku barto wax u dhigma shahaadada dugsiga sare.

WAXAAN CAAWINAAD UGU BAAHANAHAY GAARIGAYGA

LERUM AUTOMOTIVE: 952-927-8490
6329 W. Lake St.
St. Louis Park
ST. LOUIS PARK SERVICES CENTER (Xarunta Adeega)
952-929-4002
7119 Minnetonka Blvd.
St. Louis Park
Xaafada St. Louis Park waxaa kaloo ku yaala meelo kale oo adeeg laga helo karo, ka fiiri yellow pages-ka ee buuga telefoonada waxaadna ka fiirisaa bogagga ay ku qoran yihiin"Auto Repair" si aad u ogaatid meelaha ay ku yaalaan iyi lambarada telefoonadooda.

WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…
Haddii gaarigaada lagaa jiido, waxaad boliiska ka wacdaa 952-924-2618 si aad u ogaatid meesha loo qaadey. Haddii aad gaari leedahay ama aad ku wadeysid gaari gobolka Minnesota waxaa WAAJIB KUGU AH in aad soo muujisid wax caddeynaya in aad leedahaya caymis gaari si aad u soo qaadatid gaarigaada.

WAXAAN SU'AAL KA QABAA ISTICMAALKAYGA KORONTADA, BIYAHA GAASKA
WAXQABADKA BULSHADA EE NAWAAXIGA HENNEPIN
(CASH) Community Action for Suburban Hennepin: 952-930-3541
Caawinaad maaliyadeed oo loogu talagaley kharashka ku baxa kulayliyaha (heat-ka)

KULAYLIYE LA WADAAGID (SALVATION ARMY): 612-721-1668
Gargaarka ugu danbeeya ee caawinaad maaliyadeed oo loogu talagaley kharashka ku baxa kulayliyaha

ADEEGGA DEG-DEGGA AH EE ST. LOUIS PARK (STEP):
952-925-4899

KORONTADA (XCEL): 1-800-895-4999

BIYAHA & BULLAACADDA (XAAFADDA ST. LOUIS PARK):
952-924-2558

TELEFOON – (QWEST): 800-573-1311

KEEBOLKA TELEFISHANKA (TIME-WARNER): 952-522-2000

GAASKA CAADIGA AH – (RELIANT ENERGY): 612-372-4727

WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…
Haddii aad gaas urisid, isaga tag gurigaada meel kalena ka soo wac lambarkaan 612-372-5050 si aad ugu sheegtid.

WAXAAN U BAAHANAHAY CAAWINAAD MAXAA YEELAY <u>RABSHO AYAA KA JIRTA GURIGEAYGA</u>

BOOLIISKA: 911 AMA 952-924-2618
ADVO CARE: 952-993-6670
Waxaa laga heli karaa macluumaad iyo meel ku hagaajin loogu talagaley haweenka si xad gudub ah loola macaamilo. Mutarjumiin ayaa la heli karaa.

MASHRUUCA SOJOURNER: 952-933-7422
Waxaa laga heli karaa guryo ku meel gaar ah oo loogu talagaley haweenka iyo caruurta aan nabad gelyo ku dareemeynin gurigooda xad gudubka loo geysto awgiis. Mutarjumiin ayaa la heli karaa

<u>WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…</u>

Hey'ad walba oo caawisa haweenka iyo caruurta si xad gudub ah loola macaamilo lama xiriirayso qofka xad gudubka geystey.
Haddii xaaskaada, saaxiibkaada ama qof kale uu ku garaaco ama uu garaaco caruurtaada oo aadan nabad ku dareemeynin joogitaanka gurigaada waxaad la xiriirtaa lambarada kor ku xusan. Haddii adiga iyo caruurtaada aad ku jirtaan khatar deg-deg ah wac lambarka 911!

<u>WAXAAN U BAAHANAHAY MACLUUMAAD KU SAABSAN COD BIXINTA</u>

HOOLKA DEGMADA ST. LOUIS PARK: 952-924-2505
Waxaa laga helaa macluumaad ku saabsan sida la isu diiwaan geliyo iyo meesha codka lagu dhiibto.

<u>WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…</u>

Si aad codkaada u dhiibatid waa in aad ahaataa qof dhalasho Mareykan heysta oo xaalidiisu wanaagsan tahay kana weyn 18 sano. Haddii aadan hore cod ugu bixin St. Louis Park ama aad u soo guurtey, waxaa lagaaga baahan yahay in aad keentid meesha cod bixinta wax caddeynaya deganaanshahaada sida shatiga baabuur wadida Minnesota, kaarka aqoonsiga Minnesota, (Minnesota ID), waraaqaha aad ku bixisay biilasha korontada, biyaha iyo gaaska, ama kaarka diiwaan gelinta cod bixiyaha.

<u>WAXAA I HEYSTA ARIN DEG DEG AH – 911:</u>

Dir telefoonkaan ka kooban saddex lambar markii aad u baahatid

. Booliska
. Sheriff (qeyb booliska ka mid ah)
. Dab damiska
. Ambalaasta

<u>WAXAA WANAAGSAN IN LA OGAADO…</u>

La xiriir lambarkaan marka ay jiraan xaalado caafimaad oo deg-deg ah sida ilma dhalida, shilka ama marka ay jirto xaalad nafta khatar gelineysa sida wadnaha oo istaaga (ama xanuun xoog leh uu jiro). Wac lambarkaan haddii qalabka digniinta dabka ee gurigaada uu dhawaaqo ama aad urisid ama aad aragtid qiiq ama olol (holac).
Dad ku caawiya ayaa kuu imaanaya xataa haddii aadan ku hadlin telefoonka. Waxaad lambarka 911 ka soo waci karataa telefoon walba adigoon ku ridin wax lacag ah.
Haddi qalabka digniinta bixiya ee gurigaada uu dhawaaqo, si deg-deg ah uga tag dhismaha guriga adigoo isticmaalaya marinka guryaha dhex mara ama jaranjarada. Ha isticmaalin wiishka la raaco. Haddii aad heysatid telefoonka gacanta hore u soo qaado si aad u wacdid lambarka 911 ama weydiiso deriska in ay kuu wacaan.
Hubso in gurigaada uu lee yahay qalabka dareema qiiqa oo si wanaagsan u shaqeynaya.
Haddii qiiq dareemaha gurigaada uu u dhawaaqo rooti gubtey daraadiisa ama mishkilad yar oo xagga jikada ah, waxaad furtaa daaqadaha si aad hawo u soo gelisid guriga. Ha furin irida gurigaada haddii kale digniin bixiyaha dabka oo dhismaha oo dhan ayaa wada dhawaaqaya. Daaqad fur ama waxaad furtaa (daartaa) marwaxada qiiqa saarta si aad qiiqa uga sartid guriga.

KU SOO DHOWAADA
ST. LOUIS PARK !

BUUGGA TILMAAN BIXIYAHA DERISKA
CUSUB MACLUUMAAD DEG DEG AH

WAX WALBA MEESHII LAGA HELI LAHAA

FURSADO WAXBARASHO

IYO WAXYAABO KALE OO FARABADAN